

# RABDHOMAYOSARKOMA

Burada Rabdhomayosarkoma waxay kusoo fasalmataa murqaha waana nooca burada sarcoma ee ugu caansan oo ku dhaca ilmaha. Sannadkiiba, ku dhowaad tobankii ilaa lix caruur ayaa laga helaa dalka Sweden.

**Rabdhomayosarkoma** ayaa waxaa laga heli karaa meel walba lakiin inta badan rabdhomayosarkoma ayaa ku yaala meel dhexe, tusaale ahaan fashiga isha, sanka-gudahiisa, kaadi galeenka. Alfeyolar rabdhomayosarkoma ayaa inta badan ah mid kuyaala jirka kore, tusaale ahaan kalxamaha garbaha ama lugaha hoose.



**Buradda ilmaha uurka kujira ee rabdhomayosarkoma** waxaay kasoo baxdaa muruqa aan weli korin oo ka soo haray heerka ilmaha uurka kujira. Alveolar rabdhomayosarkoma waxaa uu kasoo baxaa cunnugyada muruqa korey.

## RABDHOMAYOSARKOMA

Mabda'a ahaan buraada rabdhomayosarkoma waxaa uu kasoo bixi karaa meel walba oo jirka ka mid ah oo murqo ka samayan-qaas ahaan murqaha lafaha. Ugu yaraan 60% oo kiisaska burada rabdhomayosarkoma waxay kasoo baxaan goobaha madaxa iyo dhuunta. Meesha ugu caansan, ee laga helo ugu yaraan 10% kiisaska laha gelo waa fadhiga isha. Messha kale oo caanka ah ee laga helo waa goobaha kaadiheysta.

### ASTAAMAHA

Astaamaha Buradda rabdhomayosarkoma ayaa aad u kala duwanaan kara. Fin kasoo baxa oo uusan kaa baabi'in ayaa neerfaha waxyeelayn kara ama waxayeelo gaarsiin kara xubno kala duwan. Tusaale ahaan, waxaa adkaan kara inaad kaadisid.

Burrada laftigeeda ma xanuunto, lakiin xididaha ku dhow ayaa laga yaaa inay xanuun lahaadaan. Burro oo kujirto isha-fadhigeeda waxay sababi kartaa in isha banaanka usoo buurato, halka buraada dhegta kujirto waxay kasoo muuqan kartaa duleelka dhegta.

Qofkasta oo dhiig dalool uga soo daata ayaa waxaa uu noqon karaa astaanta burrada rabdhomayosarkoma.

### OGAANSHADA

Si loo ogaado, dakhaatirrktu waxay burrada ka qaadan cunnug ama cunnug tijaabo ah. Goobaha ku hareersan meesha loogu shakisan yahay burrada ayaa waxaa laga qaadi doonaa raajo.

Burrada inta badan kufaafta sanbabadada, ayaa raajo lagaa saaraa. Dakhaatiirta yaa waxay sidoo kale qaadan raajada lafaha iyo tijaabo oo dhuuxa lafaha si ay u arkaan in cunnugyada kansarka inuu lafaha u faafeen.

Haddii ay buradda kutaasho meel u dhow maskaxda ama neefaha lafdhabarta, dhicaanka lafdhabarta ayaa sidoo kale la qaadi doonaa. Burooyinka inta badan waxaa si diiran lagu ogaan karaa iyadoo la baarayo ka duwanaashada hidda.

### NOOCYADA UGU WEYN

Rabdhomayosarkoma waxaa loo kala bixiyaa labba nooc oo ugu weyn, mida ilmaha uurka kujira ah iyo Alfeyolar Nooca ayaa door weyn ka ciyaara daaweynta iyo saadaasha.

Rabdhomayosarkoma ilmaha uurka kujira waxay kasoo baxdaa unugyada muruqaha ee aan weli soo korin ee ka haray marxaladda uurjiifka. Waxayna inta badan ku yaallaan jirka dhexdiisa, tusaale ahaan fadahiga isha, sanka-gudahiisa ama kaadi-haysta.

»

Rabdhomayosarkomada noocan ah ayaa inta badan waxay saameeysaa carruurta yaryar.

Burrada Alveolar rhabdomyosarcoma waxay kasoo baxdaa unugyada muruqa yaryar waxayna u sii kortaa jirka oo dhan, sida kalxanta garabka ama lugaha hoose.

Burrada Alveolar sarcoma, tasoo inta badan caan ku tahay carruurta waaweyn iyo dhalinyarada, waa mid dagaal badan oo adkaysi u leh daaweynta.

## DAAWAYNTA

Carruurta lagu ogaado inay qabaan rabdhomayosarkoma waxaa marwalba la mariyaa daaweynta kiimikada, qalliin iyo/ama daawaynta shucaaca.

Inta badan carruurta qabta rabdhomayosarkoma ayaa marka hore la siiyaa daaweynta kiimikada si loo yareeyo burada.

Burrada Alveolar rabdhomayosarkoma waxay caadi ahaan u baahan tahay daaweyn shucaac ah, iyadoon loo eegin haddii qalliin lagu guuleystey xitaa. Markaas kadib, cunuga ayaas sida caadiga ah waxaa loo sameynayaa dhowr jeer oo kiimikda kiimotherabiga ah. Inta badan waqtiga daaweynta ayaa ah lix bilood, laakiin xaaladaha qaarkood ayaa lagu kordhin karaa lix bilood kale oo dheeraad ah oo daaweynta hagaajint ah.

## SAADAASHA

Badbaadinta, iyadoo aan loo eegaynin nooca Rabdhomayosarkoma, ayaa si xoog leh wanagsanaaday sannadihii la soo dhaafay. Si kastaba ha ahaatee, nooca unuga oo burada ka soo baxa ayaa ah mid aad u muhiim ah, sida ay u tahay meesha buraada ku taasho. Haddaan, inta u dhaxaysa 70 ilaa 90% carruurta qaba cudurka rhabdomyosarcoma ayaa ka soo kabanaya cudurka. Si kastaba ha ahaatee, inta u dhaxaysa 20 iyo 30% dib ayuu uugu soo noqdaa.

Guud ahaan Burrada Alveolar rhabdomyosarcoma ayey aad u adagtahay in la daaweeyo haddii loo fiiriyo nooca embriyoonta, sida ay u tahay burooyinka kasoo baxda carruurta da'doodu ka weyn tahay 10 sano. Isla sidaas oo kale wuxuu ku dhacaa burooyinka ka weyn dhexroorka shan sentimitir iyo burooyinka hore u faafay xilliga cudurka la ogaanayay, taas oo ku dhacda shantii carruur hal canug.

Goobta burrada ayaa sidoo kale ah mid aad u muhiim ah markii ay dhakhaatiirtu go'aamiyaan inta daaweynta maxalliga ah ee la siin karo. Tani waxay khuseysaa goobaha qalliinka dhaawaca unugyada iyo xubnaha jirka ah mid laga fogaadaa, iyo daaweynta shucaaca tasoo ay tahay mid aad aha loo tixgeliyo.

Tusaale ahaan, daaweynta burooyinka ku dhow kaadi heysta kaadi-haysta ama xubnaha taranka waxay keeni kartaa halis ah inay saameyso shaqada kaadiheysta, nolosha galmada ee mustaqbalka ilmaha iyo dhamada ilmaha.

Xaqiiqdii waxaa hubiyey Gustaf Ljungman, oo ah macalin sare oo ka tirsan Isbitaalka Carruurta ee Jaamacadda Uppsala, September 2017.

Aragtida dheerk ee Ururka Kansarka Dhallanka ee Sweden waa in la baabi'iya kansarka caruurta. Kadib markii wax ka badan 30 sano shaqo laqgu haayay sidii kor loogu qaadi lahaa tirakoobyada noolaanshaha, maanta qiyaastii 80% carruurta qaba kansarka ayaa ka badbaada. Ilaa markii dhaweyd ee sanadii 1970-kii, xaaladda waxay ahayd mid tan ka duwan. Ururka Kansarka Dhallaanka ee Sweden waa maalgeliyaha kali ee ugu weyn ee cilmi-baarista kansarka carruurta ee dalka Iswiidan - iyada oo aan wax taageero ah ka helin dawladda, maamulka degmada ama goleha gobolka. Waxyaabahaan oo dhan waxaa noo suura gelin kara oo kali tabarucaadyo badan oo laga helay shaqsiyaadka, ganacsatada iyo ururada oon si gaara uugu mahad celineyno. Ururka Kansarka Dhallaanka waxaa ansixiyay Xakameynta Lacag Uruurinta Iswiidhishka, taas oo damaanad qaadaysa in lacagta la aruuriyay in marwalba loo isticmaalo danaha la sheegay.

BARNCANCER FONDEN